

VAX TO BUSINESS

MACLUUMAADKA BARNAAMIJKA & CODSIGA

MUDADA DHAQAALA HELISTA

April 4, 2022 – December 31, 2022

DHAQAALAHA LAHELI KARO

DHHS waxaay filaysaa inay siiso deeqo ganacsiyada xaqa u leh \$1000 - \$2000.00 qayb kasta. Wadar dhan \$300,000.00 oo maalgelin ah ayaa diyaar u ah barnaamijka.

KALA XIRIIR

Dhhs.minorityhealth@nebraska.gov

Shabakadda/Websaydka

<https://dhhs.ne.gov/Pages/Vax-to-Business.aspx>

DULUCDA/TIXRAACA IYO MACLUUMAADKA BARNAAMIJKA GUUD

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Nebraska (DHHS) oo kaashanaysa Xarunta Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC) waxaay codsanaysaa codsiyada ujeedooyinka kordhinta tallaallada COVID-19 iyo waxbarashada tallaalka ee dadka khatarta sare oogu jira bulshooyinka aan loo adeegin iyo kuwa bulshooyinka miyiga ah.

Hadafka guud ee hindisaha waa in lala kaashado ganacsiyada yaryar ee lagu kalsoon yahay ee bulshada dhexdeeda si wax looga qabto COVID-19 kala duwanaanshiyaha caafimaadka ee dadka khatarta sare leh iyo kuwa aan la daboolin. Barnaamijka waxaa uu u ogalaan doonaa ganacsiyada yaryar ee maxaliga ah in ay u dhaqmaan sidii ayaga oo ah u doode oo ay ka caawiyaan bulshadooda yaraynta COVID-19 oo ay u diyaar garoobaan faafitaano mustaqbalka ah. Ganacsiyada yaryar waxaay ku tiirsan yihiin ganacsiga soo noqnoqda iyo kalsoonida macaamiisha si ay u noolaadaan. Kalsoonidaani waxaay ganacsiyada yaryar gelisaa boos gaar ah si ay u horumariyaan tallaalka COVID-19, u saxaan macluumaadka khaldan, oo ay u siiyaan agab macaamiishooda.

Ka-qaybgalayaashu waxaay ka caawin doonaan macaamiishooda 1) samaynta go'aamo xog-ogaal ah oo la xiriira COVID-19, 2) saxitaanka macluumaadka khaldan iyo ka jawaabista su'aalaha inta badan la is weydiyo ee la xiriira yaraynta COVID-19 iyo tallaallada COVID-19, iyo 3) yaraynta caqabadaha tallaalka COVID-19 iyada oo martigelinaysa dhacdada tallaalka, iyo/ama u gudbinta macaamiisha goobta ugu dhow ee tallaalka.

PROGRAM REQUIREMENTS

Ganacsiyada la xushay waa inay buuxiyaan dhammaan shuruudaha A-D ee hoos ku taxan

- A. Tababarka:** Shaqaalaha ganacsiga ee ka qayb galaya waxaay dhamaystiri doonaan tababar onlayn ah oo 2-saac ah kaas oo siin doona macluumaad iyo ilo si ay ula hadlaan macaamiisha kuwaas oo laga yaabo inay ka labalabeeyaan helitaanka tallaalka si loo dhiso kalsoonida tallaalka. Tababarku wuxuu dabooli doonaa aasaaska COVID-19, badbaadada tallaalka, waxtarka, waxyeellooyinka, iyo agabka iyo qalabka la taaban karo.
- B. Sii macaamiisha ka hortagga COVID-19 iyo macluumaadka tallaalka oogu yaraan 3 bilood:** Ganacsiyadu waxaay bixin doonaan macluumaadka ku saabsan COVID-19 iyo tallaalka COVID-19 iyaga oo u maraya goobahooda ganacsi, ka jawaabaan su'aalaha, oo ku toosi macaamiisha goobaha ay wax badan ka heli karaan macluumaadka si ay u gaaraan go'aanka oogu wanaagsan naftooda, qoyskooda iyo bulshadooda.
- C. * Haddii aad codsanayso deeq ah \$1500 ama \$2000* Marti geli dhacdo tallaalka COVID-19:** Shaqaalaha DHHS waxaay gacan ka geysan doonaan iskudubarid iskaashi dhexmara ganacsi kasta oo la xushay iyo bixiyaha tallaalka (Waaxda Caafimaadka Maxaliga ah, Xarunta Caafimaadka ee Federaaliga ah, ama farmashiyaha) si ay u martigeliso tallaalka dhacdo. Matelaadda meheradda ayaa looga baahan yahay munaasabadda
- D. Buuxi foomka warbixinta khadka ee loo baahan yahay:** Macluumaadkan soo socda ayaa loo baahan yahay: sawirrada waraaqaha ama waraqa baraha bulshada ee macluumaadka COVID-19 ee la dhejiyay, macluumaadka ku saabsan labalaynta tallaalka macmiilka, iyo macluumaadka dhacdada tallaalka oo ay ku jiraan sawirrada dhacdada haddii ay khusayso.

ELIGIBLE BUSINESSES

Codsadayaashu waa inay ahaadaan ganacsi yar sida timo-jare, saalon, dukaanka raashinka maxalliga ah, makhaayadda maxalliga ah, iwm. gudaha gobolka Nebraska oo u adeegaya degmo kasta marka laga reebo Degmada Douglas si looga fogaado maalgelinta nuqulka ah. (Haddii meheraddadu ku taal degmada Douglas oo aad xiisaynayso inaad martigeliso rugta tallaalka oo ka baxsan fursadan fadlan la xiriir Waaxda Caafimaadka Degmada Douglas).

Ujeedada deeqdan, ganacsiga yar yar waa mid aan ka badnayn 50 (konton) shaqaale oo aan ahayn shirkad ganacsi.

Mudnaanta waxaa la siin doonaa ganacsiyada u adeega dadka halista ku ah miyiga iyo meelaha aan loo adeegin. Dadkani waa kuwa uu sida xun u saameeyay COVID-19 oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn:

- 1 Qowmiyadaha iyo kooxaha laga tirada badan yahay
- 1 Bulshooyinka leh baahi bulsheed ee sare
- 1 Bulshada Reer miyiga
- 1 Dadka naafada ah
- 1 Dadka guriga ku maqan/go'doonsan ama aan haysan gaadiid
- 1 Soo-galootiga iyo/ama qaxootiga
- 1 Dadka ay si xun u saamaysay faqriga ama sinnaan la'aanta

SI AAD U CODSATO

Fadlan buuxi codsiga ku lifaaqan. Ganacsiyadaha la doortay waa la ogeysiin doonaa.

Codsiyada dhameystiran waxaa lagu soo diri karaa iimaylka

dhhs.minorityhealth@nebraska.gov sidoo kale waxaa lagu soo diri karaa boostada goobta soo socota

ATTN: Department of Health and Human Services
Office of Health Disparities & Health Equity
P.O. Box 95026
Lincoln, NE 68509

Codsiyada waa la aqbali doonaa si joogto ah ilaa maalgelintu ka dhammaato.

VAX TO BUSINESS APPLICATION

MAGACA GANACSIGA&LAMBARKASHAQAALAH: _____

CINWAANKA DHAMEYSTIRAN: _____

LAMBARKA TALEFOONKA: _____

CINWAANKA IIMAYLKA: _____

AQOONSIG SSN / TAX #: _____

LACAGTA WAA IN LAGU BIXIYAA: _____

TIRADA LACAGTA AAD CODSANEYISO (dooro hal kaliya)

_____ \$1000 (kaliya COVID-19 waxbarashada)

_____ \$1500 (COVID-19 waxbarashada & dhacdo 1 tallaal ah)

_____ \$2000 (Waxbarashada COVID-19 & 2 dhacdo oo tallaal ah)

TIRADA SHAQAALAH GANACSIGA AH EE KA QEYB GELI DOONA TABABBARKA: _____

ADEEGYADA GANACSIGA DADWEYNAHA: (dooro dhammaan kuwa khuseeya)

_____ MIYIGA _____ AF INGIRIISKA OO XADIDAN _____ GAADIIDKA OO XADIDAN/LAMIDIBTAKOORE

_____ DADKA CURYAANKA AH _____ HISPAANIGA/ LAATINOOSKA _____ AFRIKAANKA AMERIKAANKA AH

_____ AMERIKAANKA DHALADKA AH/ AMERIKAANKA INDIYAANKA AH / ALASKAANKA DHALADKA AH

_____ ASHIYAANKA/ JASIIRADA ISLAANDARKA AH _____ CAUCASHIYAANISKA

_____ QAXOOTIGA / SOO _____ KUWA KALE (fadlan sheeg/Cadee): _____

BAAHIYAHA LUUQADDA: (Haddii aad u baahan tahay qalab ku qoran luqado aan Ingiriisi ahayn fadlan ku tax luqadda meel kasta oo hoose)

_____ TABABBARKA: _____

_____ SAWIRO & AALADHA WAXBARASHADA: _____

_____ TURJUMAAN DHACDOOYINKA TALLAALKA: _____

_____ KUWO KALE: _____

BAYAANKA SHARAXAYA SABABTA GANACSIGU OOGU WEYN YAHAY BARNAAMIJKAN:

_____ Waxaan cadeynayaa in ganacsigani yahay "ganacsi xaq u leh" sida lagu qeexay ogeysiiskan

MAGACA SHARCIGA AH & MAGACA CODSIGA AH EE DAABACAN:

NEBRASKA

Good Life. Great Mission.

DEPT. OF HEALTH AND HUMAN SERVICES